

أمة اقرأ .. أمة أتقن ..  
بين علماء الأمة وعلماء الفتنة

**Umadda Iqra' .. waa umad itqaan badan ..  
Inta u dhexeysa culimada umadda iyo culimada  
fidnada**

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah kaasoo oo kitaabkiisa kariimka ku yiri:

{قُلْ هَلْ يَسْتَوِي الَّذِينَ يَعْلَمُونَ وَالَّذِينَ لَا يَعْلَمُونَ إِنَّمَا يَتَذَكَّرُ أُولُو الْأَلْبَابِ} .

**(Dheh nabiyow ma siman yihiin kuwa wax yaqaanna iyo kuwa wax aan aqoonin waxaa uun waansama kuwa caqliga leh).**

Waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa sayidkeena iyo nabigeena inuu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa, Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaan.

**Intaas kaddib:**

Islaamka wuxuu jecleysiiyay raadinta cilmiga wuxuuna ku boorriyay dadaalka lagu heli karo cilmiga, wax ka cad ma jiro daliilka ugu horreeyay oo soo dego ee quraanka kariimka ah, waa oraahda Alle:

{اَقْرَأْ بِاسْمِ رَبِّكَ الَّذِي خَلَقَ \* خَلَقَ الْإِنْسَانَ مِنْ عَلَقٍ \* اِقْرَأْ وَرَبُّكَ  
الْأَكْرَمُ \* الَّذِي عَلَّمَ بِالْقَلَمِ \* عَلَّمَ الْإِنْسَانَ مَا لَمْ يَعْلَمْ}

(Wax ku akhri Nabiyow magaca rabbigaaga ee abuuray (khaliqiga) \* aadanahana ka abuuray xinjir \*akhri rabbigaaga waa kan sharafta leh \* ee baray sida qalinka wax loogu qoro \* aadanaha baray waxuuna aqoonin), waxyiga waxa ugu horreeya soo dego waa in lays amro akhrinta, taasoo ah albaabada aqoonta ugu horreeya, kaddib waxaa la tilmaamay qalinka oo ah qalabka cilmiga lagu qoro laguna guuriyo, waxaa ugu sugan arrinkan dadka oo dhan baraarujin lagu baraarujinayo fadliga cilmiga iyo in laysku boorriyo raadintiisa, iyo inay tahay umaddan umadda cilmiga iyo xadaaradda.

Sidoo kale suurad dhammaytiran oo ku sugan Quraanka kariimka waxaa lagu magacaabay magaca "qalinka", wuxuuna ku furfurtay Alle subxaanahu wataacaalaa oraahdiisa:

{ن \* وَالْقَلَمِ وَمَا يَسْطُرُونَ}

(Nuun \* waxaan ku dhaartay qalinka iyo waxa malaa'igtu qorayso).

Iyadoo la adkeynayo qalabka cilmiga, waxaa sharaf ku filan cilmiga Alle inuusan amrin nabigiisa inuu siyaado

weyddiisto wax ka mid ah adduunka oon ahayn cilmiga, wuxuu leeyahay Alle subxaanahu wataacaalaa:

{وَقُلْ رَبِّ زِدْنِي عِلْمًا}

(Dheh rabbiyow ii kordhi cilmiga), balse wuxuu ka dhigay nabiga in loo baxo raadinta cilmiga inuu yahay bixid dar Alle, wuxuuna caddeeyay in lagu dadaalo raadintiisa inay tahay sabab ka mid ah sababaha jannada lagu galo, wuxuu yiri:

{مَنْ خَرَجَ فِي طَلَبِ الْعِلْمِ فَهُوَ فِي سَبِيلِ اللَّهِ حَتَّى يَرْجِعَ}

(Qofkii u baxo raadinta cilmiga wuxuu ku sugan yahay jidka Ilaahay ilaa uu kasoo laabto), wuxuu leeyahay rasuulka:

{مَنْ سَلَكَ طَرِيقًا يَطْلُبُ فِيهِ عِلْمًا، سَلَكَ اللَّهُ بِهِ طَرِيقًا مِنْ طُرُقِ الْجَنَّةِ}

(Qofkii qaado jid uu cilmi ku raadinayo, Ilaahay wuxuu galinayaa jid ka mid ah jidadka jannada).

Cilmiga wuxuu ka mid yahay tiirarka dhisidda dowladaha umadaha ayaa ku hormaro qofkana, wuxuu ku gaaraa darajada, qiimihiisana wuu sarreynayaa.

Islaamka wuxuu kor u qaaday cilmiga iyo culimada iyagoo leh takhasusyo kala duwan, wuxuu leeyahay Alle:

{يَرْفَعُ اللَّهُ الَّذِينَ آمَنُوا مِنْكُمْ وَالَّذِينَ أُوتُوا الْعِلْمَ دَرَجَاتٍ وَاللَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ

{خَيْرٌ}

(Ilaahay wuxuu kor yeelayaa kuwa xaqa rumeeyay iyo kuwa cilmiga leh daragooyin Allana waxa aad sameynaysaan waa og yahay), sidoo kale wuxuu ugu markhaati kacay culimada inay yihiin kuwa isaga ka baqo wuxuu yiri:

{ إِنَّمَا يَخْشَى اللَّهَ مِنْ عِبَادِهِ الْعُلَمَاءُ إِنَّ اللَّهَ عَزِيزٌ غَفُورٌ }

(Alle waxaa uun ka baqa addoomihiisa culimada, Alle waa kan cisada leh oo dambidhaaf badan), sharaftooda iyo weynidooda awgeed wuxuu ku karaameeyay inay ka markhaati kacaan waxa ugu weyn laga markhaati kaco, wuxuu yiri Alle:

{ شَهِدَ اللَّهُ أَنَّهُ لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ وَالْمَلَائِكَةُ وَأُولُو الْعِلْمِ قَائِمًا بِالْقِسْطِ لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ الْعَزِيزُ الْحَكِيمُ }

(Alle wuxuu qirayaa inaan Alle mooyee Ilaah kale jirin, malaa'igtuna (way qiri) iyo kuwa cilmiga leh, maamulana cadaalad, Alle kale ma jiro isaga mooyee waana adkaade falsan).

Wuxuu adkeeyay nabiga – naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee – arrinkaas wuxuuna caddeeyay dadka cilmiga leh inay yihiin dadka dhaxlaya anbiyada xagga hanuuninta dadka iyo u kaxeyntooda waddada xaqqa iyo nuurka, iyo hagaajinta iyo dhismaha, wuxuu yiri rasuulka:

{ إِنَّ الْعُلَمَاءَ وَرَثَةُ الْأَنْبِيَاءِ، وَإِنَّ الْأَنْبِيَاءَ لَمْ يُورَثُوا دِينَارًا وَلَا دِرْهَمًا وَإِنَّمَا وَرَثُوا الْعِلْمَ، فَمَنْ أَخَذَهُ أَخَذَ بِحِطِّ وَافِرٍ }

(Cilimada waa dadka dhaxlaya anbiyada, anbiyadana ma dhaxalsiinin diinaar iyo dirham ee ay dhaxalsiiyeen cilmi qofkii qaati wuxuu qaatay nasiib weyn), wuxuu leeyahay rasuulka – naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee –:

(وَإِنَّ فَضْلَ الْعَالِمِ عَلَى الْعَابِدِ كَفَضْلِ الْقَمَرِ لَيْلَةَ الْبَدْرِ عَلَى سَائِرِ الْكَوَاكِبِ)

(Siduu uga fadli badan yahay caalimka caabidka waa sida uu uga fadli badan yahay dayaxa xiddigaha habeenka uu dhammeystiran yahay).

Waxaan shaki ku jirin dadka aqoonta leh oo Ilaahay - cazza wajalla - karaameeyay arrinkoodana uu kor u qaaday rasuulkana uu ammaanay inay yihiin culimada umadda ee daacadka ah, kuwaasoo og amaanada ay xambaarsan yihiin amaanada cilmiga iyo amaanada dacawada iyo amaanada caddeynta, wuxuu leeyahay nabigeena:

(نَضَرَ اللَّهُ امْرَأً سَمِعَ مَقَالَتِي فَحَفِظَهَا فَأَدَّاهَا كَمَا سَمِعَهَا ...)

(Ilaahay ha nuuriyo qofkii maqlay orahdayda oona xifdiyay una gutay siduu u maqlay).

Culimada umadda oo daacadka ah waa kuwa ogaaday muhimadda Ilaahay u doortay qaabkay tahay, inaysan ahayn muhimad diinta ama cilmiga wax lagaga kasbado, risaalada ay u taagan yihiin way ka sarreysaa arrinkaas, weyna ka weyn tahay, wuxuu leeyahay Alle asoo faraya nabigiisa:

{قُلْ مَا سَأَلْتُكُمْ مِنْ أَجْرٍ فَهُوَ لَكُمْ إِنَّ أَجْرِي إِلَّا عَلَى اللَّهِ وَهُوَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ شَهِيدٌ}

(Dheh idiinma warsanin ujuuro idinkaase iskaleh (hahi laydin warsado), ujuuradayda Alle unbaa isiin, wax walbana Alle wuu daalacan), wuxuu leeyahay Alle asoo faraya nabigiisa

{قُلْ مَا أَسْأَلُكُمْ عَلَيْهِ مِنْ أَجْرٍ إِلَّا مَنْ شَاءَ أَنْ يَتَّخِذَ إِلَىٰ رَبِّهِ سَبِيلًا}

(Dheh idinkama warsado (Xaqa Gaadhsiintiisa) ujuuro ruuxiise dooni inuu ka yeesho rabbigiisa xaggiisa waddo (Khayr ha falo)), wuxuu leeyahay Alle asoo ka hadlaya anbiyada hadalkooda: Nuux iyo Huud iyo Saalax iyo Luud iyo Shucayb – nabadgelyo korkooda ha haatee -:

{وَمَا أَسْأَلُكُمْ عَلَيْهِ مِنْ أَجْرٍ إِنْ أَجْرِي إِلَّا عَلَىٰ رَبِّ الْعَالَمِينَ}

(Idinkamana warsanaayo xaqa ujuuro, ajrigaygana rabbiga caalamkaan ka sugi), hal qaab oo caddeynaya hadafkooda inuu mid yahay iyo manhajkaba iyo niyada ay Alle la aadayaan inay run tahay iyo ikhlaas buuxa oo keligiisa loo baraxtirayo.

Culimada umadda dhabta ah waa kuwa dadaalkooda iyo waqtigooda bixiyay aqoontoodana ugu adeegay diintooda iyo dalkooda, dadka ayay la qaadeen waddada dhexdhexaadka iyo naxariista iyo is masaamaxaadda, dacwadooda waxay dhashay jiilal waxtar leh oo wax dhisaya aan wax duminin wax camiraya oon wax

kharibin oo qiyamka dadnimadana kor u qaadaya karaamada aadanahana sarreysiya, kulana noolaada dadkoo dhan nabad iyo amaan, waa kaa cilmiga waxtarka leh oo u noqonaya qofka keyd markuu dhinto kaddib, wuxuu leeyahay nabigeena:

(إِذَا مَاتَ الْإِنْسَانُ انْقَطَعَ عَنْهُ عَمَلُهُ إِلَّا مِنْ ثَلَاثَةٍ ، إِلَّا مِنْ صَدَقَةٍ جَارِيَةٍ ، أَوْ عِلْمٍ يُنْتَفَعُ بِهِ ، أَوْ وَلَدٍ صَالِحٍ يَدْعُو لَهُ )

(Qofka markuu dhinto camalkiisa wuu go'ayaa seddex waxyaabood mooyee, sadaqo soconaysa, iyo aqoon laga faa'idayo, iyo wiil suuban oo usoo duceynaya), nabiga wuxuu ka magangali jiray cilmiga aan waxtarin waxna dhisin waxna camirin, akhlaaqda iyo dhaqankana aan hagaajinin, wuxuu dhihi jiray rasuulka:

(سَلُوا اللَّهَ عِلْمًا نَافِعًا ، وَتَعَوَّدُوا بِاللَّهِ مِنْ عِلْمٍ لَا يَنْفَعُ)

(Weddiya Alle cilmi waxtar leh, kana magangala cilmi aan waxtaraynin), ducadiisa waxaa ka mid ahayd:

(اللَّهُمَّ إِنِّي أَعُوذُ بِكَ مِنْ عِلْمٍ لَا يَنْفَعُ ، وَمِنْ قَلْبٍ لَا يَخْشَعُ ، وَمِنْ نَفْسٍ لَا تَتَّبِعُ ، وَمِنْ دَعْوَةٍ لَا يُسْتَجَابُ لَهَا)

(Ilaahayow waxaan kaa magangalayaa cilmi aan waxtarin iyo qalbi aan khushuucin, iyo naf aan dhergin, iyo duco aan la aqbalin).

Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka

\*\*\*

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago, waxaan qirayaa sayidkeena iyo nabigeena inuu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa, Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaan iyo kuwa wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

### **Walaalaha islaamka ahow:**

Culimada daacadka ah waa kuwa leh hadyiga suuban iyo qaabka wanaagsan iyo dhexdhexaadka, waa kuwa xambaarsan calanka dhexdhexaadka waqti kaste, waxay ka ilaaliyaan diinta taxriifka kuwa xagjirka iyo tafsiirka jaahiliinta iyo beenta kuwa baadilka wata.

Culimada fidnada oo ka dhigtay diinta Alle wax ay ku gaaraan danahooda kuwaas waa kuwa ku dhiirraday diinta Alle, oona iska soo tuuray fatwooyinka dhibka keenaya aan waxtarin, oo dadka kala geeya oon wax isu keenin oo wax dumiya oon wax dhisin, umadda u furaya iridda gaalaysiinta oo Islaamka uu ka digay in la galo, wuxuu leeyahay rasuulka:

(أَيُّمَا أَمْرٍ قَالِ لِأَخِيهِ يَا كَافِرٌ فَقَدْ بَاءَ بِهَا أَحَدُهُمَا ، إِنَّ كَانَ كَمَا قَالَ،  
وَالْأَرْجَعْتُ عَلَيْهِ)



(Qof kastoo walaalkiisa ku dhaho: gaalyahow midkooda ayaa la laabanaya, hadduu yahay siduu dhahay haddii kale way kusoo noqonaysaa).

Culimada fidnada waxay ka dhigteen ad'adeygga iyo ku cirriirinta dadka manhaj, waa manhaj aad uga fog samaaxadda Islaamka iyo dhexdhexaadkiisa, Islaamka wuxuu ka qaaday dadka dhib kaste, cirriiri kastana waa ka suuliyay, wuxuu leeyahay Alle:

{وَمَا جَعَلَ عَلَيْكُمْ فِي الدِّينِ مِنْ حَرَجٍ}

(Mana yeelin Diinta Dhib), wuxuu leeyahay nabigeena:

{بَشِّرُوا ، وَلَا تُنْفَرُوا ، وَيَسِّرُوا ، وَلَا تُعَسِّرُوا}

(Bishaareeya hana didinina, fududeeya hana adkeynina)

Fatwooyinka in la ad'adkeeyo waa wax khilaafsan dhexdhexaadka Islaamka oo ay diinta Islaamka xaniifka ay la gaar noqotay, wuxuu yiri Alle:

{وَكَذَلِكَ جَعَلْنَاكُمْ أُمَّةً وَسَطًا لِتَكُونُوا شُهَدَاءَ عَلَى النَّاسِ}

(Saasaan idinka dhignay umad dhexdhexaad si aad marag ugu noqotaan dadka), wasadiyada waxaa laga wadaa cadaalad iyo dhexdhexaad iyo in laga fogaado xadgudubka oo sabab u noqday halaagga umadaha wuxuu leeyahay nabigeena:

{يَا أَيُّهَا النَّاسُ إِنَّا كُنَّا وَالْعُلُوِّ فِي الدِّينِ، فَإِنَّمَا أَهْلَكَ مَنْ كَانَ قَبْلَكُمْ الْعُلُوُّ فِي الدِّينِ}

(Dadow iska jira xadgudubka diinta, dadkii idinka horreeyay waxaa halaagay xadgudubka diinta), wuxuu yiri Sufyaan Athowri: -Ilaahay ha u naxarsiitee – "cilmiga agteena waa rukhso fiqi ku sugan, ad'adeygga qof kastaa sameyn kara".

Culimada fidnada waxaa la raaciyaa culimada dadka lumiya oo cilmi la'aan hadla, oo aan garanin umadda inay u baahan tahay in lala yimaado sababaha ugu adag, oo aan ogaanin inay tahay camiraadda addunka ujeedooyinka ugu muhimsan ee diimaha, dadkana inaysan diinteena tixgalinaynin haddaynaan ku hormarin arrinka adduunkeeda, haddaan ku hormarno arrinka adduunkeena dadka way tixgalinayaan diinteena iyo adduunkeena, dadka aan ogeyn sidaas oo wacdigooda in badan uga hadleen in laysaga digo adduunka, taasoo keentay inay caamadu ku dhacaan fahan qaldan oo ka dhexeeya diinta iyo adduunka iyo inay lagama maarmaan tahay sababaha in lala yimaado, suhdiga si qaldan ayay u fahmeen oo inuu yahay in laga fogaado nolosha adduunka, waxay illaaween oraahda Alle:

{ رَبَّنَا آتِنَا فِي الدُّنْيَا حَسَنَةً وَفِي الْآخِرَةِ حَسَنَةً وَقِنَا عَذَابَ النَّارِ }

(Rabbiyo na sii adduunka wanaag, aakhirana nasii wanaag, nagana dheeree cadaabka naarta).

Waxaan adkeynaynaa inay ku dhiirradaan fatwada dadka aan u qalmin cilmi ahaan waa baadinimo iyo

baadiyayn, immisa fatwo cilmi la'aan oo u keentay dhib dad noloshooda, waxaa laga wariyay Jaabir bin cabdillaahi -Ilaahay raalli haka noqdee – wuxuu yiri: Safar ayaan u baxnay nin naga mid ah ayaa dhagax ku dhacay madaxa ayuu ka dakhray, kaddib ayuu isku junuubay wuxuu weyddiiyay dadka uu la socday: ma ii halaysaan rukhso aan ku gabagabbaysto? waxay dhaheen: kuuma heli karno rukhso adoo biyaha awoodo, wuu qubeystay wuuna dhintay, markaan u nimid rasuulka waxaa loo sheegay arrinkaas, wuxuu yiri:

(قَتَلُوهُ ، قَتَلَهُمُ اللَّهُ ، أَلَا سَأَلُوا إِذْ لَمْ يَعْلَمُوا ؛ فَإِنَّمَا شِفَاءُ الْعِيِّ السُّؤَالُ ،  
 إِنَّمَا كَانَ يَكْفِيهِ أَنْ يَتَيَّمَّمَ وَيَعَصِرَ ، أَوْ يَعْصِبَ عَلَى جُرْحِهِ خِرْقَةً ، ثُمَّ  
 يَمْسَحَ عَلَيْهَا ، وَيَغْسِلَ سَائِرَ جَسَدِهِ)

(Way dileen Alle ha dilee maxay u weyddiin waayeen haddayna garanin, daawada jaahilka waa su'aal, waxaa ku filnaa inu gabagabbaysto oo uu dhaawiciisa ku duubo good kaddib uu masaxo oo uu dhaqo jirkiisa inta kale).

maxaa inooga baahi badan qof kaste inuu laasimo takhasuskiisa iyo inuu ku dadaalo wuxuu hagaajin karo asoo ka baqaya Alle oona tixgalinaya cilmiga oona qaddarinaya halista ay leedahay kalmadda, immisa kalmad qofka cilmi la'aan usoo tuuray sabab u noqotay burbur iyo halaag iyo fasahaad, aaammusidda ayaa ka khayr badan hadal dhib keenaya oon waxtarin, hadduu

aammusi lahaa qofkaan wax garanaynin khilaafka wuu dhammaan lahaa, wuxuu leeyaay nabigeena:

(... وَمَنْ كَانَ يُؤْمِنُ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ فَلْيُكْفِرْ خَيْرًا أَوْ لِيَصْمُتْ)

(... qofkii rummeysan Alle iyo maalinta aakhiro khayr ha sheego ama ha iska aammuso).

Ilaahayow xaqqa inuu xaq yahay noo tus naguna arsaaq raaciddiisa, baadilkana inuu baadil yahay noo tus naguna arsaaq ka fogaanshihiisa, wixii na anfacayana na bar, wixii aad na bartayna nagu anfac, cilmigana noo siyaadi Masarteenana noo ilaali iyo dhammaan caalamka.